# Gobolka Ohio
# Wakiilashada Daryeelka Caafimaadka

[R.C. §1337]

____________________________________________

(Daabac Magaca oo buuxa)

________________________________

(Taariikhda Dhalashada)

Tani waa Wakiilashadayda ee Daryeelka Caafimaadka. Waxaan ka noqonayaa dhammaan Awoodaha Qareenka ee Daryeelka Caafimaadka aan anigu saxeexaya. Waxaan fahmayaa sifada iyo ujeedada dhokumentigan. Haddii la ogaado in shuruud kasta aanay ansax ahayn ama aan la fulin karin, ma saamayn doonto dhokumentgan.

Waxaan fahmayaa in wakiilkayga uu gaadhi karo go'aamada daryeelka caafimaadka aniga keliya mar kasta oo dhakhtarka i daryeelayaa uu go'aan ku gaadhay inaan lumiyay awooda aan ku gaadho go'aamada daryeelka caafimaadka la wargeliyay. Si kastaba ha ahaatee, tani uma baahna ama ma maldahdo in maxkamaddu ay ku dhawaaqdo sidii qof aan karti lahayn.

## Qeexitaanka

**Qofka wayn** macnaheedu waxa weeye qofka 18 sano jirka ah ama ka wayn.

**Wakiilka ama qareenka** xaqiiqda macnaheedu waxa weeye qof wayn oo karti leh kaas oo qofka (maamule) uu magacaabi karo Daryeelka Caafimaadka ee Wakiilashada si loo sameeyo go'aamada daryeelka caafimaadka ee maamulaha.

**Ardafiishal ahaan ama teknoolajiga qaybiya nafaqada ama fuuq ku celinta jidhka** macnaheedu waxa weeye cuntadda iyo dareeraha lagu bixiyo xididka jidhka ama tuumbada quudinta. *[Waxaad diidi kartaa ama joojin kartaa tuumbada quudinta, ama waxaad u oggolaan karta wakiilka Wakiilashada Daryeelka Caafimaadku inuu diido ama joojiyo ardafishal ahaan nafaqada ama fuuqa.]*

**Saami** macnaheedu waxa weeye xeerka caymiska in laga ilaaliyo hanti qofka xaditaanka ama khasaaraha ay sababtay Masuulka guul daradiisa Hantida si sax ah loogu sameeyay waajibaadyadiisa ama teeda.

**Daryeelka raaxada** macnaheedu waxa weeye tallaabo kasta, caafimaadka ama nidaamka kalkaaliska, daawaynta ama wax ka qabadka, ay ku jirto nafaqada iyo ama fuuqa la siiyo jidhka, ee yareeya xanuunka bukaanka ama raaxo darrada, laakiin may inaanay dib u dhigin dhimashada.

**CPR** micnaheedu waxa weeye dib u miiraabida kicinta dareenka suulay ee qofka, mid ka mid ah qaababka loo bilaabo neefsashada qofka am garaaca wadnaha marka mid uun uu istaagay. Kuma jirto banaynta marinada hawada qofka sababta aan ahayn miyirka qofka soo celinta marka uu baraad la' yahay.

**Dib Aan u soo celinayn Miyirka qofka ama Nidaamka DNR** macnaheedu waxa weeye nidaamka caafimaadka dhakhtarka ee ku qoran diiwaanka bukaanka si ay u sheegto in bukaanku aanu helayn soo kicinta la qabanyo qofka miyir beelay xabbadka si uu miyirku ugu soo noqdo.

LeadingAge Ohio · Ohio State Medical Association · Ohio Hospital Association · Ohio Osteopathic Association · Ohio State Bar Association — Connect. Advance. Succeed.

**Masuulka** macnahiisu waxa weeye qofka ay doorteen maxkamadda dhexda nidaamka sharciga ah si loo gaadho go'aanka waaxda. **Masuuliyada** waxaa dejiya ballantan maxkamadda.

**Daryeelka Caafimaadka** macnaheedu waxa weeye daryeel kasta, daawayn, adeega ama nidaam lagu joogtaynayo, cudur baadhid ama daawayn qof caafimaadkiisa jidhka ama maskaxda.

**Go'aamada daryeelka caafimaadka** macnaheedu waxa weeye bixinta oggolaanshaha laga warqabo, diidista bixinta oggolaanshaha laga warqabo, ama ka noqoshada oggolaanshaha laga warqabo ee daryeelka caafimaadka.

**Wakiilashada Daryeelka Caafimaadka** macnaheedu waxa weeye dhokumentiga sharciga ah ee u oggolaada wakiilka inuu gaadho go'aanada daryeelka caafimaadka ee maamulaha badanka xaaladaha daryeelka caafimaadka marka maamulaha aanu in dheeraad ah gaadhi karin go'aamadan. Sidoo kale, maamulaha waxa uu u oggolaan karaa wakiilka inuu soo urursho macluumaadka caafimaadka ilaashan ee iyo isagoo metelaya maamulaha isla markaaba ama wakhti kasta oo kale. Wakiilashada Daryeelka Caafimaadka MAAHA awooda qareenka ee dhaqaale.

Dhokumentiga Wakiilashada ee Daryeelka Caafimaadka sidoo kale waxaa loo isticmaali karaa in lagu doorto qof(dad) si loo metelo masuulka maamulaha qofka ama hantida guryaha. Xataa haddii maxkamaddu ay doorato masuulka maamulaha, Wakiilashada ee Daryeelka Caafimaadka way dhaqan gelaysaa iyaddoo maxkamaddu ay xukunto mooyaane haddii kale.

**Daawaynta nolol--sii waadirta** macnaheedu waxa weeye nidaamka dawada, daawaynta, wax ka qabadka ama tallaabada kale ee, marka la siiyo bukaanka, muhiim ahaan sii dheeraysa nidaamka dhimashada.

**Bayaanka Dardaaranka Qoran ee qofka** macnaheedu waxa weeye dhokumentiga sharciga ah ee u oggolaada qofka wayn ee kartida leh ("bayaan jeediyaha") inuu caddeeyo waxa daryeelka caafimaadka qofka bayaan jeedinaya uu doonayo ama aanay doonayn marka isaga ama iyaddu ay si aad u sakaraad ah u jiran tahay ama si joogta ah u miyir la' dahay oo in dheeraad ah ma sheegi karo rabitaankiisa ama keeda. MA oo ma beddesho dardaaranka, kaas oo loo isticmaalo in lagu doorto fuliyaha ama maareeya hantida guriyaha qofka dhimashada ka dib.

**Xaalada miyir la'aanta joogtada ah** macnaheedu waxa weeye xaalad aan sideedii lagu soo celin karin kaas oo bukaanku su joogta ah aanu u ogsoonayn naftiisa ama keeda iyo waxa ku hareeraysan. Ugu yaraan labba dhakhtar waa inay baadhaan bukaanka oo isku raacaan in bukaanku uu wadar ahaan ay ka luntay shaqada maskaxda sare oo aanu awoodin inay dhib ka soo gaadho ama uu dareemo xanuun.

**Maamule** macnaheedu waxa weeye qof wayn oo karti leh kaas oo saxeexa Wakiilashada Daryeelka Caafimaadka.

**Xaalada aan la dawayn karin** macnaheedu waxa weeye aan caadi dib u noqon karin, aan la dawayn karin, iyo xaalad aan la dawayn karin oo uu sababay cudur, jiro, ama dhaawac kaas oo, darajo macquula oo hubanti caafimaadka ah sida lagu go'aamiyay ee waafaqsan heerarka caafimaadka macquulka ee ka qayb galaha u imanaya dhakhtarka iyo dhakhtar kale oo baadhay ka muhiimka ah, labbadaba kuwan soo socda ayaa loo adeegsadaa: (1) ma jiri karaan wax bogsasho ah iyo (2) dhimasho ayaa dhici karta gudaha muddo gaaban oo la xidhiidha haddii daawaynta nolol sii waarinta aan la qaadan.

**Qofka ilaalinta ku jira** macnaheedu waxa weeye qofka maxkamaddu u doorato in aanu ahayn qof karti leh Qofka ilaalinta ku jira, hanti dhaqaale, ama labbadaba, waxaa ilaaliya masuulka maxkamaddu doorato oo kormeera.

**Magacaabida Wakiilka**. Qofka hoos lagu magacaabay waa wakiilkayga kaas oo ii gaadhi doonaa aniga go'aamada daryeelka caafimaadka sida lagu oggolaaday warqaddan.

Magaca wakiilka iyo Xidhiidhka:______________________________________________

Ciwaanka:___________________________________________________________

Lambarka(rada) telefoonka: ___________________________________________________

☐ **Ku qorida xarfaha magacayga u horeeya, saxeexa, sixid ama calaamad kale bogoskan, waxaan gaar ah aan oggolaanayaa wakiilkayga inuu helo macluumaadkayga caafimaadka ilaashan wakhti kasta oo mustaqbalka ah.**

**Hagitaanka Wakillka.** Wakiilkaygu waxa uu ii gaadhi doonaa aniga go'aamada daryeelka caafimaadka ee ku salaysan tilmaamahayaga dhokumentigan iyo rabitaanadayda haddii kale uu og yahay wakiilkaygu. Haddii wakiilku uu rumaysan yahay in rabitaankaygu ay khilaafsan tahay waxa ku qoran dhokumentgan, dhokumentigan waxay qaadan doontaa ahmiyada. Haddii aanay jirin tilmaamo iyo haddii rabitaankaygu aanay caddayn ama aan la garanayn xaalad kasta oo gaar ah, wakiilkaygu waxa uu go'aan ka gaadhi doonaa danahayga ugu fiican isagoo ka fekeraya dheefafaha, culaysyada iyo khataraha ka iman karan go'aanada la bixiyay. Haddii wax wakiil ah aan la heli karin, dhokumentigan waxay hagi doonaan go'aamada ku saabsan daryeelkayga.

**Magacaabida wakiilka(ada) beddelka ah.** Haddii wakiilka kor lagu magacaabay aan isla markaaba la helin karin ama aan u diyaar ahayn ama aan awoodin inuu go'aamo ii gaadho aniga, ka dib waxaan magacaabi, amarka soo socda ee ahmiyada, dadka ku qoran hoos sidii wakiilada beddelka ah *[isku tallaab mari laymanka aan la isticmaalin]*:

**X ka baxsan aaga haddii aan la isticmaalin**

Beddelka labbaad ee magaca wakiilka iyo xidhiidhka: ______________________________

Ciwaanka:___________________________________________________________

Lambarka(rada) telefoonka:_____________________________________________

Beddelka labbaad ee magaca wakiilka iyo xidhiidhka: ______________________________

Ciwaanka:___________________________________________________________

Lambarka(rada) telefoonka:_____________________________________________

Qof kastaa waxa uu ku tiirsanaa bayaanka wakiilka beddelka ah ee sare lagu magacaabay ee isaga ama iyadda si sax ah ugu shaqaynayso warqaddan hoosteeda iyo qofkan aanay samayn wax baadhitaan dheeraad ah ama waydiin ah.

**Masuuliyada Wakiilka.** Laga reebo alaabtan oo aan isku tallaab mariyay iyo iyaddoo hoos imanaysa doorashooyin kasta waxaan ku sameeyay tan Wakiilasahada Daryeelka caafimaadka, wakiilkaygu waxa uu leeyahay masuuliyad buuxda oo dhammaystiran si loo gaadho dhammaan go'aamada daryeelka ee aniga. Masuuliyada waxaa ka mid ah, laakiin kuma xadidna, mida soo socota:

1. Si loogu oggolaado maamulka dawooyinka xanuunka baabiiya ama daawaynta ama qaliinka (ay ka mid tahay qaliinka) wakiilkaygu, talada dawada, waxa uu rumaysan yahay inuu raaxo i dareensiiyo, xataa in kastoo dawooyinka dhexdooda, daawaynta iyo qaliinka waxay dedejiyan karaan dhimashadayda.

2. Haddii aan ku jiro xaalad caafimaad oo darran oo aanan lahayn Bayaanka Dardaaranka hore loo bixiyay ee ka hadasha daawaynta xaaladan, si loo gaadho go'aan ku saabsan daawaynta nolol sii waarinta, ay ku jirto aradafiishal ahaan ama teknoolaji ahaan nafaqada la bixiyo iyo helida biyo

3. In la siiyo, ka noqo ama diid inaad bixiso oggolaanshaha laga warqabo ee nidaamyada daryeelka caafimaadka, daawaynta, wax ka qabadka ama tallaabooyinka kale.

4. SI loo codsado, dib loogu eego oo loo helo macluumaad kasta, hadal ah ama qoraal ah, oo ku saabsan xaalada jidhka ama maskaxda, ay ku jirto, laakiin aan ku xadidnayn, dhammaan caafimaadkayga iyo diiwaanda daryeelka caafimaadka.

5. Si loo oggolaado shaacinta dheeraadka ah ee macluumaadka iyo in la shaaciyo macluumaadka caafimaadka iyo la xidhiidha walaacyada xaaladayda iyo daawaynta dadka kale.

6. Si la iigu fuliyo shaacin kasta ama dhokumentiyada loo baahan karo si loo helo caafimaadka iyo macluumaadka la xidhiidha.

7. Si loo fuliyo oggolaanshaha, ka dhaafitanada iyo shaacinta masuuliyada aniga iyo hantidayda dhammaan dadka u hogaansama tilmaamaha wakiilkayga iyo go'aamada. In la magdhabo ama aan waxyeelo loo qabsan, kharash kasta, qof kasta oo sameeya marka uu ku tiirsan yahay Wakiilashada Daryeelka Caafimaadka. Waxaan u hogaansami doonaa magdhowgan uu gelay wakiilkaygu.

8. Si loo xusho, loo shaqaaleeyo oo loo fasaxo shaqaalaha daryeelka caafimaadka iyo adeegyada bixiyaha daryeelka caafimaadka guriga iyo waxa la midka ah.

9. Si loo doorto qandaraaska oggolaanshahayga, ii wareeji ama oggolow ka bixitaankayga caafimaadka ama xarunta daryeelka caafimaadka, ay ku jirto, laakiin kuma xadidna, cusbitaalada, guryaha kalkaaliska, xarunta taakulaynta nolosha, xarun daryeel, guryaha dadka waa wayn iyo waxa la hal maala.

10. In la ii qaado ama la habbeeyo gaadiidka aan raacayo ilaa meesha halka Wakiilashada Daryeelka Caafimaadka lagu sharfo., Haddii aan joogo meesha halka xuruudaha dhokumentigan aan la fulin.

11. Si loo dhammaystiro ama la iigu saxeexo mida soo socota:

- Oggolaanshaha daawaynta daryeelka caafimaadka, ama soo saarida Amarada In Aan Miyirka La soo celin (DNR) ama amarada kale ee la midka ah; iyo
- Codsiyada in loo wareejiyo xarumo kale, in laga saaro si ku lid ah talada daryeelka caafimaadka, ama codsiyo kale oo la mid ah; iyo
- Dhokumenti kasta oo kale oo la rabo ama lama huraan ah si loo hirgeliyo go'aamada daryeelka caafimaadka uu wakiilkaygu oggolaado si loo waafajiyo dhokumentigan.

***Tilmaamaha gaarka ah. [Tilmaamahan waxaa loo adeegsan karaa keliya haddii AANAN lahayn Bayaanka Dardaaranka Nolosha oo shaqaynaya.]***

☐ **Anoo xarfaha magacayga hore ku qoraya, saxeexa, ama saxaya ama calaamad kale saaraya bogoskan, waxaan si gaar ah u oggolaanayaa wakiilkayga inuu diido ama, haddii daawayntu bilaabantay, inaan ka noqdo oggolaanshaha, shuruuda ardafiishal ahaan ama teknoolajiahaan lagu siiyo nafaqo ama fuuq haddii aan si joogta ah ku jiro xaalad miyir beelid ah IYO dhakhtarkayga iyo ugu yaraan, dhakhtarka aniga i baadhay ayaa go’aamiyay, ilaa darajo macquul ah oo hubaal caafimaad ah, in ardafiishal ahaan ama teknoolaji ahaan nafaqada la qaybiyo iyo fuuq soo celinta aanay raaxo isiin doonin aniga ama aanay xanuunka iga yarayn doonin. [R.C. §1337.13(E)(2)(a) iyo (b)]**

**Xadidnaanta Masuuliyada Wakiilka.** Waxaan fahmayaa in xadidnaanta masuuliyada wakiilkaygu ay waafaqsan tahay Sharciga Ohio.

1. Wakiilkaygu malaha masuuliyada uu ku diido ama kaga noqdo oggolaanshaha laga warqabo ee daryeelka caafimaadka lama huraanka si loo bixiyo daryeel raaxo leh.

2. Wakiilkaygu ma haysto masuuliyada uu ku diido ama kaga noqdo daryeelka caafimaadka haddii aan uur leeyahay, haddii diidmada ama ka noqoshada daryeelka caafimaadku ay soo af jarayso uurkayga, iyaddoo uurka ama daryeelka caafimaadka ay khatar gelinayso noloshayda mooyaane, ama iyaddoo imaanshaha dhakhtarka iyo ugu yaraan hal dhakhtar oo kale ilaa heer darajo macquul ah ama hubinta caafimaad ay go’aamiso in uur jiifka aanu nolol ku dhalan doonin mooyaane.

3. Wakiilkaygu ma dalban karo ka noqoshada daawaynta nolosha---sii waarida, ay ku jirto mida ardafiishalka ah ama nafaqada teknoolaji ahaan lagu siiyo nafaqada iyo biyaha, iyaddoo aan ku jiro xaalad noloshu ay khatar ku sugan tahay ama si joogta aan ugu jiro xaalad miyir beelid ah iyo labba dhakhtar ayaa go’aamiyay daawaynta nololsha---sii waarida inaanay ama in dheeraad ah aanan raaxo ka helayn anigu ama aanay khafiifinayn xanuunkayga.

4. Haddii aan hore u oggolaaday daryeelka caafimaadka, wakiilkyagu kama noqon karo daawayntaa iyaddoo xaaladaydu ay si wayn isu beddeshay mooyaane markaas daryeelka caafimaadka ma ka guul gaadhayso ujeedada kaas oo aan doortay daryeelka caafimaadka.

**Tilmaamaha kale ee xadidaadaha:** Waxaan bixin karaa tilmaamaha dheeraadka ah ama waxaa soo rogi karaa xadidnaanta la saarayo masuuliyada wakiilkayga. Hoos waxaa ah tilmaamaha gaarka ah iyo xadidnaanta:

*[Haddii meesha hoose aanay ku filnayn, waxaad lifaaqi kartaa boggag dheeraad ah. Haddii aanad haysan wax tilmaamo dheeraad ah ma xadidnaanshaha, ku qor “Waxba” hoos.]*

| |
|---|
| |

**MAGACAABIDA MASUULKA**

[R.C. §1337.28 (A) iyo R.C. §2111.121]

*[Waxaad dhici karta, laakiin looma baahna in la magacaabo masuulka, haddii dacwada masuulnimada la bilaabay, qofkaaga ama hantidaada.]*

Waxaan fahmay in qof kasta oo aan doorto aan looga baahnayn inuu aqbalo masuuliyadaha masuuliyada, iyo in maxkamadda dardaaranka ansixinaysaa ay joogtayso garsoorka masuuliyad kasta. [R.C. §2111.121(C)]

Waxaan fahmayaa in maxkamadda ay sharfi doonto doorashadayda laga reebo sababta wanaagsan ama u qalmid la'aanta. [R.C. §2111.121(B)]

Waxaan fahmayaa in, haddii **masuulka qofka** la iidoorto aniga, sida waajibaadyadan masuulka ay ku jiraan gaadhida go'aamada maalin---ilaa---maalin ee sifada iyaddoo imetelaysa aniga, sida cuntada, dharka, iyo qaban qabooyinka nolosha, laakiin yan ama Wakiilashada Daryeelka Caafimaadka xiga ay dhaqan gal sii ahaan doonto oo ay maamulayso go'aamada daryeelka caafimaadka ee aniga, iyaddoo haddii kale maxkamaddu ay go'aamiso mooyaane. Maxkamaddu waxay go'aamin doontaa xadadka, hakin doontaa ama joojin doontaa tan ama Wakiilasho kasta oo Daryeelka Caafimaadka ku xigta, haddii ay ogaadaan in xadidka, hakinta ama joojintu ay tahay dantayda ugu wanaagsan. [R.C. §1337.28 (C)]

**Waxaan niyada ku hayaa in masuuliyada la siiyay wakiilkayga Wakiilashada Daryeelka Caafimaadka inay tirtiri doonto baahida maxkamad kastaa inay doorato masuulka qofkayga.** Si kastaba ha ahaatee, haddii dacwadan bilaabanto, waxaan dooranayaa qofka(dadka) hoose qaabka loo qoray sida **masuulka qofkayga.**

☐ Qoritaanka xarfaha hore ee magacayga, saxeexa, sax ama calaamad kale bogoskan, waxaan u dooranayaa wakiilkayga ama wakiilka(ada) beddelka ah, haddii wax, inuu noqo **masuulka qofkayga**, qaabka sare loogu magacaabay.

Haddii aanad dooran wakiilkayga ama wakiilka beddelka inuu ahaado **masuulka qofkayga**, waxaan dooranayaa qofka(dadka) soo socda, amarkan *[inay isku tallaab mariyaan laymanka aan la isticmaalin]:*

X ka baxsan aaga haddii aan la isticmaalin

Masuulka beddelka ee magaca qofka iyo xidhiidhka: ______________________

Ciwaanka:______________________

Lambarka(rada) telefoonka:______________________

Masuulka beddelka ee magaca qofka iyo xidhiidhka: ______________________

Ciwaanka:______________________

Lambarka(rada) telefoonka:______________________

**Masuulka hantida dhulka ama dhismaha** macnaheedu waa qofka ay dooratay maxkamaddu inay u qaado go'aamada maaliyada iyaddoo uu metelayo qofka, oo ay maxkamadduna qayb ka tahay. Masuulka hantida ama dhulka waxaa looga baahan yahay inuu ku xidhnaanto, iyaddoo lagu dhaafo qoraal ahaan mooyaane ama maxkamaddu hesho inaanay lama huraan ahayn.

☐ Anoo ku qoraya xarfaha hore ee magacayga, saxeexa, sax ama calaamad kale bogoskan, waxaan u dooranayaa wakiilkayga ama wakiilka(ada) beddelka ah, haddii wax, sida **masuulka hantidayda**, qaabka sare loogu magacaabay.

Haddii aanan dooran wakiilkayga ama wakiilka beddelka **inuu ahaado masuulka hantidayda**, waxaan dooranayaa qofka(dadka) soo socda, amarkan *[inay isku tallaab mariyaan laymanka aan la isticmaalin].*

X ka baxsan aaga haddii aan la isticmaalin

Masuulka dhulkayga iyo xidhiidhada: ______________________________

Ciwaanka:______________________________

Lambarka(rada) telefoonka:______________________________

Masuulka beddelka ah ee dhulkayga iyo xidhiidhka: ______________________________

Ciwaanka:______________________________

Lambarka(rada) telefoonka:______________________________

☐ Anoo ku qorayo xarfaha magacayga, saxeexa, sax ama calaamad kasta bogoskan, waxaan tilmaamayaa heshiishka in laga dhaafo masuulka ama qofka masuulka beddelo **masuulka hantidayda.** [R.C. §1337.28 (B)]

Haddii **aanan** saarin wax calaamad ah bogoskan, waxay la macno tahay inaan ka filayo masuulka ama qofka beddela masuulka hantidayda in lagu xidho. [R.C. §1337.28 (B)]

**Malaha Taarikhda ay Dhacayso:** Wakiilashada Daryeelka Caafimaadka ma lahaan doonto wakhti muddadeedu dhacdo oo ma saamayn doonto naafanimadayda ama wakhtiga inta ka tagay.

**Fulinta Wakiilkayga** Wakiilkaygu wuu ii qaadi karaa aniga, kharashkyaga, fal kasta oo wakiilkaygu uga fekero in lagu talin karo in lagu fuliyo rabitaankayga si waafaqsan dhokumentigan.

**Shaacinta Masuulkiyada Gaarka ah ee Wakiilkayga.** Wakiilkaygu kama masuul ahaan doono qof kasta oo kale jebin kasta oo waajibka ah iyaddoo jebintan waajibka lagu galay khiyaamo mooyaane, oo ahayd qaab aan sax ahayn, ama si aan la kala jeclanayn iyaddoon looga fiirsan ujeedada dhokumentigan ama dantayda ugu fiican. [R.C. §1337.35]

**Nuquladu waxay la mid yihiin kuwa Asalka ah.** Qof kasta waxa uu isku halayn karaa nuqul dhokumentigan ah. [R.C. §1337.26(D)]

**Codsiga Dibada ka ah Gobolka.** Waxaan niyada ku hayaa in dhokumentigan lagu sharfo garsoor kasta ilaa xadka uu sharcigu oggolaado. [R.C. §1337.26(C)]

Waxaan buuxiyay **Dardaaranka Nolosha**: Haa________Maya _______

**SAXEEXA MABDA'A**

Waxaan fahmay in aan ka masuul ahayn inaan u sheego xubnaha qoyskayga iyo dhakhtarkayga, qareenkayga, la taliyahayga diinta iyo kuwa kale waxa ku saabsan Wakiilasahada Daryeelka Caafimaadka. Waxaan fahmayaa in aan siinayo koobiyaal Wakiilashadan Daryeelkan Caafimaadka qof kasta.

Waxaan fahmayaa inaan ku soo xaraynayo koobo Wakiilashada Daryeelkan Caafimaadka maxkamadda ansixinaysa si ay u ilaaliso. [R.C. §1337.12(E)(3)]

Waxaan fahmayaa inaan saxeexayo Wakiilashada Daryeelka Caafimaadka oo sheego taariikhda saxeexayga, iyo in saxeexidayda miduun uu markhaati ka yihiin labba qof oo wayn kuwaas oo u qalma saxeexayga AMA saxeexida in lagu hor qirto nootaayada dad waynaha. [R.C. §1337.12]

Waxaan ku saxeexayaa magacayga Wakiilashada Daryeelka Caafimaadka

ee________________, xaga __________________________________, Ohio.

_____________________________________________

Maamulaha

**[Dooro Markhaatiyaal AMA Qirashada Nootaayada ah.**

**MARKHAATIYADA** [R.C. §1337.12(B)]

*[Dadka soo socda UMA adeegaan sidii markhaatiga Wakiilasahda Daryeelka Caafimaadka:*

- *Wakiilkaaga, haddii ay wax jiraan;*
- *Masuulka qofkaaga ama hantida, haddii ay wax jiraan;*
- *Beddel kasta ama qofka beddela wakiilka ama masuulka, haddi ay wax jiraan;*
- *Qof kasta oo dhiig aad wadaagtaan, guur, ama korsasho (tusaale ahaan, xaaskaaga iyo carruurta);*
- *Dakhtarka ku dawaynaya, iyo*
- *Maamulaha guri kasta oo kalkaaliso halka, aad daryeelka ku heshid.]*

***Waxaan caddaynayaa in Qofku saxeexay ama qirtay Wakiilashada Daryeelka Caafimaadka anigoo jooga, oo uu Qofku u muuqday inuu fayoobaa oo aan la khasbin, aan la khiyaamayn ama saamayn aan la filayn.***

______________________________/______________________________/______________

Saxeexa Markhaatiga Kow Magaca Daabacan ee Markhaatiga Kow Taariikhda

________________________________________________________________________

Cinwaanka Markhaatiga koowaad

______________________________/______________________________/______________

Saxeexa Markhaatiga Labbaad Magaca Daabacan ee Markhaatiga Labbaad Taariikhda

________________________________________________________________________

Cinwaanka Markhaatiga labbaadaad

***<u>AMA, haddii aanay jirin markhaatiyaal:</u>***

**QIRASHADA NOOTAAYADA** [R.C. §1337.12]

Gobolka Ohio
Degmadda____________________ss.

Taariikhda___________, aniga hortayda, nootaayada dad waynaha hoos la saxeexay, shakhsi ahaan yimid ____________________________________, mabada'a Wakiilashada Daryeelka Caafimaadka sare, iyo kaas oo qirtay in isaga/iyadda uu fuliyay ujeedo isku mid ah oo qoraalka lagu caddeyay. Waxaan caddaynayaan in qofku uu u muuqdo mid niyad caafimaad leh qaba oo aan la khasbin oo aanay jirin khiyaama ama saamayn aan la filayn.

____________________________________

Nootaayada Dad waynaha

Wakhtigayga nootaayadu way dhacaysaa: _____________

Khidmadaydu waa joogto: __________________________

*© Janaayo 2022. Dib waa loo daabici karaa isticmaalka dad waynaha, qareenada, caafimaad iyo dhakhtarka cudurada oo dhan, cusbitaalada, ururada qareenada, bulshooyinka caafimaadka iyo ururada aan macaash doonka ahayn iyo ururada. Dib looma soo saari karo ganacsi ahaan iib ah ama macaash ah.*

**OGAYSIISKA QOFKA WAYN EE FULINAYA WARQADDAN**

Tani waa warqad muhiim ah oo sharci ah Ka hor inta aan la fulin dhokumentigan, waa inaad ogaato xaqiiqooyinkan:

Dhokumentigan waxa uu siiyaa qofka aad magacowdo (qareenka dhab ahaan) awooda uu adiga kuugu gaadho BADANKA go'aamada daryeelka caafimaadka haddii aad waydo awooda aad ku gaadho go'aamada daryeelka caafimaadka la wargeliyay. Awoodan waxay keliya dhaqan gal tahay marka dhakhtarka daryeelayaa uu go'aamiyo inaad lumisay kartida aad ku gaadho go'aamada daryeelka caafimaadka la wargeliyay laftaada iyo ka sakow dhokumentigan, ilaa inta aad leedahay kartida aad gaadho go'aamada daryeelka caafimaadka la wargeliyay laftaadu, waxay haysanaysaa xaqa aad ku gaadho go'aamada caafimaadka iyo daryeelka caafimaadka kale ee laftaada.

Waxaad ku dari kartaa xadidista gaarka ah ee dhokumentigan ee wakiilashada xaqiiqdii si laguugu gaadho adiga go'aamada daryeelka caafimaadka.

Iyaddoo waafaqsan xadidis kasta oo aad ku darto warqaddan, haddii aad soo xaadirayso dhakhtarka go'aansanaya inaad lumisay kartida aad ku gaadho go'aan laga warqabo arrinta daryeelka caafimaadka, qareenku dhab ahaan GUUD AHAAN waxa uu ku oggolaan doonaa warqaddan inuu adiga kuu gaadho go'aamada daryeelka caafimaadka xad lamid ah sida aad ku gaadhayso go'aamadan laftaadu, haddii aad lahayd kartida aad sidaas ku samayso. Masuuliyada qareenka dhan ahaan inuu adiga kuu gaadho go'aamada daryeelka caafimaadka GUUD AHAAN waxaa ka mid ahaan doona masuuliyada in la bixiyo oggolaanshaha la wargeliyay, si loo diido oggolaanshaha la wargeliyay, ama looga noqdo oggolaanshaha la wargeliyay ee daryeel kasta, daawaynta, adeega, ama nidaamka lagu sii wadayo, lagu baadhayo, ama lagu dawaynayo xaalada jidhka ama maskaxda.

SI KASTABA HA AHAATE, xataa haddii qareenka dhab ahaan uu leeyahay masuuliyada buuxda si adiga laguugu gaadho go'aamada daryeelka si waafaqsan warqaddan, qareenka dhaba haan WELIGII looma oggolaanayo inuu sameeyo mida soo socota:

(1) Diid ama ka noqo oggolaanshaha la wargeliyay ee daawaynta nolol---sii waadista, iyaddoo dhakhtarka daryeelayaa iyo dhakhtar kale oo ku baadha adiga go'aan ku gaadho, ilaa darajo macquul oo hubinta caafimaad ah iyo sida waafaqsan heerarka caafimaadka macquulka, in miduun kuwa soo socdaa ku habboon yahay:

(a) Waxay dhib kaa soo gaadhaysaa mid aan laga noqon karin, aan la dawayn karin iyo xaalad aan la dawayn karin oo uu sababay cudur, jiro, ama dhaawac kaas oo

(i) aanu jiri karin ka bogsasho oo

(ii) dhimashadaadu ay dhici karto gudaha muddo yar haddii daawaynta nolol---waarista aan la qaadan, oo dhakhtarka ku daryeelayaa uu go'aan ku gaadho si dheeraad ah, ilaa darajo macquul ah ee hubinta caafimaadka oo waafaqsan heerarka caafimaad ahaan macquulka, inaanay jirin suuragal ahaansho macquul ah inaad dib u heli doonto inaad gaadho go'aamada daryeelka caafimaadka la wargeliyay ee naftaada.

(b) Waxaad ku jirtaa xaalada joogtada ah ee miyir beelka ah ee lagugu sifeeyay sida inaad ku jirto si aan laga noqon karin mid aan naftaada ogayn iyo deegaankaaga iyo waayida buuxda ee inay shaqayso qaybta sare ee maskaxda, iyaddoo ee keenayso inaadan awood u yeelin inaad dareento xanuun ama dhib, iyo dhakhtarka ku daryeelaya dheeraad ahaan inuu go'aamiyo, ilaa darajo macquul hubinta caafimaad iyo sida waafaqsan heerarka dawada macquulka ah, inaanay jirin suuuragal ahaansho macquul ah inaad dib u heli waydo awooda aad ku gaadho go'aamada daryeelka caafimaadka ee naftaada.

(2) Diido ama ka noqdo oggolaanshaha laga warqabo ka noqoshadiisa ee daryeelka caafimaadka ah ee lama huraanka ah si daryeel raaxo leh laguu siiyo (laga reebo in, haddii qareenka dhab ahaan aanay mamnuuc ka ahayn in sidaas la sameeyo si waafaqsan (4) hoos, ee shuruuda nafaqada ama fuuqa gelinta jidhkaaga sida lagu sharaxay sida waafaqsan (4) hoos). **(Waa inaad fahantaa in daryeelka raaxada leh uu ku xadidan yahay sharciga Ohio si loogu jeedo ardafiishal ahaan ama nafaqada teknoolaji ahaan loo siiyo (nafaqo) ama cabbitaanada (fuuq siinta jidhka) marka la siiyay si loo yareeyo xanuunka ama raaxo darrada, inaan dib loogu dhigin dhimashadaada, iyo wax kasta oo kale caafimaad ama nidaamka kalkaaliska, daawaynta,**

**Ogaysiiska sida uu u baahan yahay Xeerka Dib loo eegay ee Ohio §1337.17**

**wax ka qabadka, ama tallaabada kale ee la qaadayo si loo yareeyo xanuunkaaga ama raaxo darada, inaan dib loo dhigin dhimashadaada. Natiijo ahaan, haddii dhakhtarka ku daryeelaya uu go'aan ka gaadhayo in dawada hore loo sharaxay ama nidaamka kalkaaliska, daawaynta, wax ka qabadka, ama tallaabada kale in dheeraad ah uma adeegi doonto ama uma adeegayso inay raaxo ku siiso adiga ama inay xanuunka kaa khafiifiso, markaa, si waafaqsan (4) hoos, qareenkaaga xaqiiqdii waxaa loo oggolaan doonaa inuu diido ama ka noqdo oggolaanshaha la wargeliyay ee nidaamka, daawaynta, wax ka qabadka, ama tallaabo kale.);**

(3) Dii ama kag noqdo daryeelka caafimaadka haddii aad uur leeyahay iyo haddii diidmada ama ka noqoshada ay soo af jarayso uurka, iyaddoo uurka ama daryeelka caafimaadka ay khatar gelinayso nolosha mooyaane, ama iyaddoo dhakhtarka ku daryeelaya iyo ugu yaraan hal dhakhtar oo kale ilaa heer darajo macquul ah ama hubinta caafimaad ay go'aamiso in uur jiifka aanu nolol ku dhalan doonin mooyaane kaas oo adiga ku baadhaa uu go'aamiyo, in darajo macquul oo hubisa caafimaadka iyo si waafaqsan heerarka caafimaadka macquulka ah, in uur jiifka aanay labbadu noolaanayn).

**(4) Diid ama ka noqo oggolaanshaha la wargeliyay ee siinta ardafiishal ahaan ama nafaqada teknoolaji ahaan lagu siiyo (nafaqada) ama cabbitaan (fuuq) ee adiga lagu siiyo, iyaddoo:**

**(a) Waxaad ku jirtaa xaalad nolol ahaan khatar ah ama aad ku jirto xaalad joogta ah oo miyir beel ah.**

**(b) Waxaad u tagtaa dhakhtar iyo ugu yaraan hal dhakhtar oo kale kaas oo ku baadhay adiga inaad go'aansado, ilaa darajo macquul ah oo hubista caafimaad ah iyo si waafaqsan heerarka caafimaad ah macquulka ah, nafaqadaas ama fuqaas jidhka gelaya uma adeegi doono ama in dheeraad ah uma adeego in raaxo lagu siiyo adiga ama lagaa fududeeyo xanuun.**

**(c) Haddii, laakiin keliya haddii, aad si joogta ah aad xaadlad miyir beel ugu jirto, waxaad oggolaanaysaa qareenka xaqiiqdii inaad diido ama aad ka noqoto oggolaanshaha la wargeliyo siinta nafaqada ama fuuqa adiga lagu siinayo iyaddoo la samaynayo labbadaba mida soo socota dhokumentigan:**

**(i) Ay ku jirto warbixinta oo ku qoran xarfo waa wayn ama qoraal kale oo aad u muuqdo, ay ka mid tahay, laakiin aanay ku xadidnayn, qoraalada farta kala duwan, qoraalka wayn, ama nooca qoraalka madowga ah, ee qareenka dhab ahaan inuu diido karo am aka noqon kara oggolaansha la wargeliyay ee siinta nafaqada ama fuuq siinta jidhkaaga haddii aad xaalad miyir bee loo joogta ah aad ku jirto iyo go'aanka in nafaqada ama fuuqa jidhka aanahy in dheeraad ahayn ama inaanay in dheeraad ah u adeegayn inay adiga raaxo ku siiso ama kaa fududayso xanuunkaaga uu gaadho , ama sixida ama haddii kale calaamadinta bogiska onlaynka ah (haddii ay jiraan wax) ee ku xigta warbixin la mid ah ee warqaddan.**

**(ii) Ku qorida xarafa hore ee magacaaga ama saxeexa hoosta ama meel ku dhegan warbixinta, sax, ama calaamad kale oo hore loo sharaxay.**

**(d) Dhakhtarka ku daryeelayaa waxa uu go'aan ku gaadhay, si aaminid wanaagsan, in qareenka laguu oggolaaday dhab ahaan uu diiday ama ka noqday oggolaanshaha la wargeliyay in nafaqo lagu siiyo ama fuuq jidhkaaga haddii aad ku jirto xaalad miyir beel joogto ah addoo u hogaansamaya shuruudaha sare ee (4)(c)(i) iyo (ii) sare.**

(5) Ka noqoshada oggolaanshaha la wargeliyay ee daryeel kasta oo caafimaad kaas oo aad hore u oggolaatay, iyaddoo isbeddelka xaalada jidhkaaga ay si wayn u yaraysay dheefta daryeelka caafimaadkaaga, ama iyaddoo daryeelka caafimaadka aanu ahayn, ama in dheeraad si wayn aanu waxtar u lahayn in la gaadho ujeedooyinka aad u oggolaatay isticmaalkeeda.

Intaa waxa dheer, marka lagu dhaqmayo masuuliyada si loo gaadho go'aamadaada, qareenku dhab ahaan waxa uu jili doonaa si waafaqsan rabitaankaaga, ama rabitaanka aan la aqoon, si loo jilo danta kuugu fiican. Waxaad u muujin kartaa rabitaankaaga qareenka dhab ahaan addoo ku daraya iyaga dhokumentigan ama addoo ku ogaysiinayo qareenka dhab ahaan qaab kale.

Marka la waafajinayo dhokumentigan, qareenka dhab ahaan GUUD AHAAN waxa uu lahaanayaa xuquuq la mid ah mida aad ku helayso macluumaadka ku saabsan daryeelka caafimaadka la soo jeediay, in dib loo eego diiwaanada daryeelka caafimaadka, iyo in la oggolaado shaacinta diiwaanada daryeelka caafimaadka. Waxaad xadidi kartaa xaqaas ku jira dhokumentigan haddii aad sidaas doorato.

**Ogaysiiska sida uu u baahan yahay Xeerka Dib loo eegay ee Ohio §1337.17**

Guud ahaan, waxaad magacaabi kartaa qof wayn oo kasta oo karti leh sida qareenka xaqiiqdii sida waafaqsan dhokumentigan. Si kastaba ha ahaatee, MA magacaabi kartid dhakhtarka ku daryeelka ama maamule guri kasta oo daryeel kaas oo aad ku helayso daryeelka sida qareenka xaqiiqdii waafaqsan dhokumentigan. Intaa waxa dheer, MA magacaabi kartid shaqaale ama wakiil dhakhtarka ku daryeelaya, ama shaqaale ama wakiil xarunta daryeelka caafimaadka taas oo lagugu dawaynayo, qareen ahaan xaqiiqdii si waafaqsan dhokumentigan, iyaddoo miduun nooca shaqaalaha ama wakiilka uu yahay qof wayn oo karti leh oo aad dhiig wadaagtaan, guur, ama korsasho, ama iyaddoo nooc kale oo shaqaale ama wakiil uu yahay qof wayn oo karti leh mooyaane iyo adiga iyo shaqaalaha ama wakiilka uu yahay qof wayn oo karti leh iyo shaqaalaha ama wakiilka ay yihiin xubnaha nidaam diimeed oo isku mid ah.

Dhokumentigan malaha taariikh dhicitaan si waafaqsan sharciga Ohio, laakiin waxaad dooran kartaa inaad caddayso taariikhda kaas oo wakiilashadaada adkaysi leh ee daryeelka caafimaadka muddadeedu dhacayso. Si kastaba ha ahaatee, hadidi aad caddayso taariikhda dhicitaanka oo ka dib aad waydo awooda aad ku gaadho go'aamada la wargeliyay ee daryeelka caafimaadka ee naftaada taariikhdsaas, dhokymentiga iyo awooda ay siinayso qareenkaaga dhab ahaan waxay sii ahaan doontaa dhaqan gal ilaa aad dib uga hesho awooda aad ku gaadho go'aamada daryeelka la wargeliyay ee naftaada.

Waxaad leedahay xaqa aad kaga noqoto magacaabista qareenka xaqiiqda iyo xaqa aad kaga noqonta dhokumentiga oo dhan wakhti kasta iyo qaab kasta. Ka noqoshad anoocan ah guud ahaan waxay dhaqan geli doontaa marka aad caddayso ujeedaada inaan ka noqoto. Si kastaba ha ahaataa, haddii aad ogaysiiso dhakhtarka ku daryeelaya dhokumentigan, ka noqoshadan kasta waxay dhaqan gelaysaa keliya marka aad la xidhiidhiso iyadda dhakhtarka ku daryeelaya, ama marka markhaatiga ka noqoshada ama shaqaalaha daryeelka caafimaadka kaas ka noqoshada lagala xidhiidhay ee markhaatigan kala xidhiidhay iyadda dhkhtarka ku daryeelaya.

Haddii aad fuliso dhokumentigan oo aad samayso wakiilasahada adkaysiga leh ee ansaxa ah ee daryeelka caafimaadka ay wadato, waxay ka noqon doontaa mid kasta oo ka horaysay, awood qareen oo adkaysi leh oo ansax ah ee daryeelka caafimaadka aad samaysay, iyaddoo aad ku sheegto haddii kale gudaha dhokumentigan mooyaane.

Dhokumentigan ansax uma ah sida wakiilashada adkaysiga leh ee daryeelka caafimaadka iyaddoo laga hor qiro nootaayada dad waynaha horteeda mooyaane ama uu saxeexo ugu yaraan dad markhaati ah oo wayn kuwaas oo jooga marka aad saxeexdo ama marka aad saxeexdo. Ma jiro qof dhiig ahaan kuula xidhiidha adiag, guur, ama korsasho oo noqon kara markhaati. Qareenka dhab ahaan, dhakhtarka ku daryeelka iyo maamule guri kasta oo daryeel kaas oo aad ku helayso daryeelka sidoo kale waxay u qalmaan inay markhaatiyaal noqdaan. Haddii uu ku qoran yahay shay dhokumentigan aanad fahmin, waa inaad waydiisaa qareenku inuu kuu sharaxo.

**Ogaysiiska sida uu u baahan yahay Xeerka Dib loo eegay ee Ohio §1337.17**

LIFAAQA

Ogaysiiskan lama cusboonaysay marka shuruudaha gaarka ah ee sharciga ku saabsan Wakiilashada Daryeelka Caafimaadka waxaa la beddelay Maarso 2014. Fadlan ogow isbeddelada soo socda:

Waxaa dhici karta, laakiin looma baahna, oggolow wakiilkaaga si aad u hesho macluumaadkaaga caafimaadka, ay ka mid tahay macluumaadka taas oo sharcigu ilaaliyo iyo haddii kale looma heli karo wakiilkaaga. Waxaad oggolaan kartaa wakiilkaaga inuu heli karo macluumaadkaaga caafimaadka isla markaab marka aad saxeexdo dhokumentigan ama wakhti kasta oo dambe, xataa in kastoo weli aad awoodo si loo gaadho go'aamadaada daryeelka caafimaadka.

Waxaad dhici karta sidoo kale, laakiin looma baahna, isticmaal dhokumentigan si aad u magacodo masuuladaada ama hantidaada haddii dacwada masuulnimada la bilaabayo.

*©Janaayo 2022. Dib waa loo daabici karaa isticmaalka dad waynaha, qareenada, caafimaad iyo dhakhtarka cudurada oo dhan, cusbitaalada, ururada qareenada, bulshooyinka caafimaadka iyo ururada aan macaash doonka ahayn iyo ururada. Dib looma soo saari karo ganacsi ahaan iib ah ama macaash ah.*

# Gobolka Ohio
# Ogaysiiska Bayaanka Dardaaranka Nolosha ee Qofka ku Dhawaaqaya

Ujeedada Bayaankan Dardaaranka Nolosha waa in la qoro rabitaankaaga daawaynta nolol--waarinta, ay ka mid tahay ardafishal ahaan ama teknoolaji ahaan nafaqada loo siiyo iyo fuuqa, in la hakiyo ama laga noqo haddii aanad awoodin inaad gaadho go'aamada caafimaadka la wargeliyay <u>iyo</u> aad ku jirto xaalad halis ah ama si joogta ah aad ugu jirto xaalad miyir beelid ah. Bayaanka Dardaaranka Nolosha ma saameeyo masuuliyada shaqaalaha daryeelka caafimaadka si ay raaxo adiga kuu siiso. Daryeelka raaxada macnaheedu waxa weeye tallaabo kasta oo la qaado si loo yareeyo raaxo darada, laakiin maaha in dib loo dhigo dhimashada.

Haddii <u>aanad</u> dooran inaad xadido waxna ama dhammaan qaababka daawaynta nolol sii waarista, ay ka mid tahay CPR, waxaad leedahay xaqa sharciga ah aad sidaas ku doorato qoraal ahaan gudaha dhokumenti ka duwan.

Sida waafaqsan Sharciga Ohio, Bayaanka Dardaaranka Nolosha waxaa **keliya oo la adeegsadaa keliya shakhsiyaadka ku jira xaalada naftu halis ku jirto ama xaalad miyir beelid joogto ah**. Haddii aad rabto inaad hagto daawaynta caafimaadka duruufaha kale, waa inaad diyaarisaa Wakiilashada Daryeelka Caafimaadka. Haddii aad ku jirto xaalad noloshu halis ku jirto ama si joogta ah aad ugu jirto xaalad miyir beelid ah, Bayaanka Dardaaranka Noloshu waxa uu ka awood mudnaadaa Awooda Qareenka Daryeelka Caafimaadka.

*Waa inaad ka fekertaa dhammaystirka Bayaanka Dardaaranka Nolosha ee Cusub haddii xaaladaada caafimaadku is beddesho ama haddii aad mar dambe go'aansato inaad dhammaystirto Awooda Qareenka Daryeelka Caafimaadka. Haddii aad hayso labbadaba Bayaanka Dardaaranka Nolosha iyo Wakiilashada Daryeelka Caafimaadka, waa inaad haysataa nuqulo warqaddan ah si wada jir ah. Soo qaado dhokumentiga(yada)aada mar kasta aad tahay bukaanka xarunta daryeelka caafimaadka ama marka aad ka cusboonaysiiso diiwanadaada caafimaadka dhakhtarkaaga.*

# Ohio
# Bayaanka Dardaaranka Nolasha

[R.C. §2133]

______________________________________________________

(Daabac Magaca Buuxa)

______________________________

(Taariikhda Dhalashada)

Tani waa Bayaankayga Dardaaranka Nolasha Waxaan ka noqonayaa dhammaan Bayaanada Dardaaranka Nolosha hore ee aan saxeexay. Waxaan fahmayaa sifada iyo ujeedada dhokumentigan. Haddii la ogaado in shuruud kasta aanay ansax ahayn ama aan la fulin karin, ma saamayn doonto dhokumentigan.

Waxaan ahay qof u muuqdo mid niyad caafimaad leh qaba oo aan la khasbin oo aanay jirin khiyaama ama saamaynta aan la filayn. Waxaan ahay qof wayn oo karti leh kaas oo fahmaya oo aqbalaya cawaaqibka falkan. Waxaan si aan khasab ahayn ugu dhawaaqayaa tilmaantayda in dhimashadayda aanay si ardafishal ah lagu sii dabo dheerayn. [R.C. §2133.02 (A)(1)]

Waxaan niyada ku hayaa in bayaanka dardaaranka Nolosha ay qadarin doonaan qoyskayga iyo dhakhtarada sidii weedhaysa u dambaysa ee xaqa sharciga si loo diido daryeelka caafimaadka gaarka ah. [R.C.§2133.03(B)(2)]

## Qeexitaanka

**Qofka wayn** macnaheedu waxa weeye qofka 18 sano jirka ah ama ka wayn.

**Wakiilka ama qareenka** xaqiiqda macnaheedu waxa weeye qof wayn oo karti leh kaas oo qofka (maamule) uu magacaabi karo Awooda Daryeelka Caafimaadka ee Qareenka si loo sameeyo go'aamada daryeelka caafimaadka ee maamulaha.

**Ardafiishal ahaan ama teknoolajiga qaybiya nafaqada ama fuuq ku celinta jidhka** macnaheedu waxa weeye cuntadda iyo dareeraha lagu bixiyo xididka jidhka ama tuumbada quudinta. *[Waxaad diidi kartaa ama joojin kartaa tuumbada quudinta, ama waxaad u oggolaan karta wakiilka Awooda Qareenka Daryeelka Caafimaadku inuu diido ama joojiyo ardafishal ahaan nafaqada ama fuuqa.]*

**Daryeelka raaxada** macnaheedu waxa weeye tallaabo kasta, caafimaadka ama nidaamka kalkaaliska, daawaynta ama wax ka qabadka, ay ku jirto nafaqada iyo ama fuuqa la siiyo jidhka, ee yareeya xanuunka bukaanka ama raaxo darrada, laakiin may inaanay dib u dhigin dhimashada.

**CPR** micnaheedu waxa weeye dib u miirabida kicinta dareenka suulay ee qofka, mid ka mid ah qaababka loo bilaabo neefsashada qofka am garaaca wadnaha marka mid uun uu istaagay. Kuma jirto banaynta marinada hawada qofka sababta aan ahayn miyirka qofka soo celinta marka uu baraad la' yahay.

**Ku dhawaaqaha** macnaheedu waxa weeye qofka saxeexaya Bayaanka Dardaaranka Nolosha.

**Dib Aan u soo celinayn Miyirka qofka ama Nidaamka DNR** macnaheedu waxa weeye nidaamka caafimaadka dhakhtarka ee ku qoran diiwaanka bukaanka si ay u sheegto in bukaanku aanu helayn soo kicinta la qabanyo qofka miyir beelay xabbadka si uu miyirku ugu soo noqdo.

**Daryeelka Caafimaadka** macnaheedu waxa weeye daryeel kasta, daawayn, adeega ama nidaam lagu joogtaynayo, cudur baadhid ama daawayn qof caafimaadkiisa jidhka ama maskaxda.

**Go'aamada daryeelka caafimaadka** macnaheedu waxa weeye bixinta oggolaanshaha laga warqabo, diidista bixinta oggolaanshaha laga warqabo, ama ka noqoshada oggolaanshaha laga warqabo ee daryeelka caafimaadka.

**Awooda Qareenka ee Daryeelka Caafimaadka** macnaheedu waxa weeye dhokumentiga sharciga ah ee u oggolaada wakiilka inuu gaadho go'aanada daryeelka caafimaadka ee maamulaha badanka xaaladaha daryeelka caafimaadka marka maamulaha aanu in dheeraad ah gaadhi karin go'aamadan. Sidoo kale, maamulaha waxa uu u oggolaan karaa wakiilka inuu soo urursho macluumaadka caafimaadka ilaashan ee iyo isagoo metelaya maamulaha isla markaaba ama wakhti kasta oo kale. Awooda Qareenka ee Daryeelka Caafimaadka MAAHA wakiilashada dhaqaalaha.

Dhokumentiga Wakiilashada ee Daryeelka Caafimaadka sidoo kale waxaa loo isticmaali karaa in lagu doorto qof(dad) si loo metelo masuulka maamulaha qofka ama hantida guryaha. Xataa haddii maxkamaddu ay doorato masuulka maamulaha, Wakiilashada ee Daryeelka Caafimaadka way dhaqan gelaysaa iyaddoo maxkamaddu ay xukunto mooyaane haddii kale.

**Daawaynta nolol sii waadirta** macnaheedu waxa weeye nidaamka dawada, daawaynta, wax ka qabadka ama tallaabada kale ee, marka la siiyo bukaanka, muhiim ahaan sii dheeraysa nidaamka dhimashada.

**Bayaanka Dardaaranka Qoran ee qofka** macnaheedu waxa weeye dhokumentiga sharciga ah ee u oggolaada qofka wayn ee kartida leh ("bayaan jeediyaha") inuu caddeeyo waxa daryeelka caafimaadka qofka bayaan jeedinaya uu doonayo ama aanay doonayn marka isaga ama iyaddu ay si aad u sakaraad ah u jiran tahay ama si joogta ah u miyir la' dahay oo in dheeraad ah ma sheegi karo rabitaankiisa ama keeda. MA aha oo ma beddesho dardaaranka, kaas oo loo isticmaalo in lagu doorto fuliyaha ama maareeya hantida guriyaha qofka dhimashada ka dib.

**Xaalada miyir la'aanta joogtada ah** macnaheedu waxa weeye xaalad aan sideedii lagu soo celin karin kaas oo bukaanku su joogta ah aanu u ogsoonayn naftiisa ama keeda iyo waxa ku hareeraysan. Ugu yaraan labba dhakhtar waa inay baadhaan bukaanka oo isku raacaan in bukaanku uu wadar ahaan ay ka luntay shaqada maskaxda sare oo aanu awoodin inay dhib ka soo gaadho ama uu dareemo xanuun.

**Maamule** macnaheedu waxa weeye qof wayn oo karti leh kaas oo saxeexa Awooda Qareenka Daryeelka Caafimaadka.

**Xaalada aan la dawayn** karin macnaheedu waxa weeye aan dib looga noqon karin, aan la dawayn karin, iyo xaalad aan la dawayn karin oo uu sababay cudur, jiro, ama dhaawac kaas oo, darajo macquula oo hubanti caafimaadka ah sida lagu go'aamiyay ee waafaqsan heerarka caafimaadka macquulka ee ku dhawaaqaha dhakhtarkiisa daryeelaya iyo dhakhtar kale oo baadhay ku dhawaaqaha, labbadaba kuwan soo socda ayaa loo adeegsadaa: (1) ma jiri karaan wax bogsasho ah iyo (2) dhimasho dhici karta gudaha muddo gaaban oo la xidhiidha haddii daawaynta nolol sii waarinta aan la qaadan.

**Malaha Taarikhda ay Dhacayso:** Bayaanka Dardaaranka Nolosha ma lahaan doono muddo uu dhacayo. Si kastaba ha ahaatee, waan ka noqon karaa wakhti kasta. [R.C. §2133.04(A)]

**Nuquladu way la mid yihiin kuwa Asalka ah.** Qof kasta waxa uu isku halayn karaa nuqul dhokumentigan ah. [R.C. §2133.02(C)]

**Codsiga Dibada ka ah Gobolka.** Waxaan niyada ku hayaa in dhokumentigan lagu sharfo garsoor kasta ilaa xadka uu sharcigu oggolaado. [R.C. §2133.14]

Waxaan dhammaystiray **Awooda Qareenka ee Daryeelka Caafimaadka:** Haa______Maya ______

**Wargelinaha.** *[Fiiro: Uma baahnid inaad cid magacowdo. Haddii aan qof la magacaabin, sharcigu waxa uu u baahan yahay dhakhtarka daryeelayaa inuu sameeyo dedaal macquul si uu ugu wargeliyo mid ka mid ah dadka soo socda qaabka la magacaabay, masuulkaaga, xaaskaaga, carruurtaada waa wayn kuwaas oo la heli karo, waalidkaaga, ama badanka walaalaha dadka waa wayn ah kuwaas oo la heli karo.]*

Dhacdada dhakhtarka i daryeelayaa uu go'aansado in daawaynta nolol waarista la hakiyo ama laga noqdo, dhakhtarkaygu waxa uu samayn doonaa dedaal macquul ah si uu ugu wargeliyo hal ka mid ah dadka hoos lagu magcaabay, nidaamka soo socda ee ahmiyada *[isku tallaab mari wixii layn aan la isticmaalin ah]*: [R.C. §2133.05(2)(a)]

**X ka baxsan aaga haddii aan la isticmaalin**

Magaca koowaad ee qofka lala xidhiidhayo iyo xidhiidhka:__________________________

Ciwaanka: __________________________________________________________

Lambarka(rada) telefoonka: ______________________________________________

Magaca labbaad ee qofka lala xidhiidhayo iyo xidhiidhka: __________________________

Ciwaanka: __________________________________________________________

Lambarka(rada) telefoonka: ______________________________________________

Magaca saddexaad ee qofka lala xidhiidhayo iyo xidhiidhka: ________________________

Ciwaanka: __________________________________________________________

Lambarka(rada) telefoonka: ______________________________________________

Haddii aan ku jiro **XAALAD CAAFIMAAD OO HALIS AH** oo aanan awoodin inaan gaadho go'aamadayda daryeelka caafimaadka, AMA haddii aan ku jiro **XAALADA MIYIR BEELKA JOOGTADA AH** oo ma jirto suuragal ahaanshaha macquulka ah inaan dib u heli doono awooda aan ku gaadho go'aamada la wargeliyay, ka dib waxaan farayaa dhakhtarkauga inuu ii oggolaado inaan u dhinto si dabiici ah, isagoo isiinaya aniga keliya **raaxada daryeelka**.

Wixii ah ujeedada bixinta raaxada daryeelka, waxaan oggolaanayaa dhakhtarkaygu inuu:

1. Isiiyo daawaynta aan nolosha waarin, ay ku jirto CPR;
2. Jooji ama ka noqo ardafishal ahaan ama nafaqada teknoolaji ahaan lagu bixiyo ama fuuqa, shuruud ah in, haddii ku jiro xaalad miyir beelid joogta ah, waxaan oggolaaday joojintan ama ka noqoshada sida waafaqsan **Tilmaamaha Gaarka** hoos iyo xaaladaha kale waa la buuxiyay.
3. Soo saarida Amarka DNR; iyo
4. Ha qaadin wax tallaabo dib loogu dhigayo dhimashadayda, keliya isiiya dayeelka si uu iiga dhigo mid raaxo leh oo xanuunka yareeyo.

***Tilmaamaha gaarka ah*.**

☐ **Anoo xarfaha magacayga hore ku qoraya, saxeexa, ama saxaya ama calaamad kale saaraya bogoskan, waxaan si gaar ah u oggolaanayaa dhakhtarkayga inuu hakiyo, ama, haddii daawayntu bilaabantay, inaan ka noqdo oggolaanshaha, shuruuda ardafiishal ahaan ama teknoolaji ahaan lagu siiyo nafaqo ama fuuq haddii aan si joogta ah ku jiro xaalad miyir beelid ah IYO dhakhtarkayga iyo ugu yaraan, dhakhtarka aniga i baadhay ayaa go'aamiyay, ilaa darajo macquul ah oo hubaal caafimaad ah, in ardafiishal ahaan ama teknoolaji ahaan nafaqada la qaybiyo iyo fuuq soo celinta aanay raaxo isiin doonin aniga ama aanay xanuunka iga yarayn doonin. [R.C. §2133.02(A)(3) iyo R.C. §2133.08]**

***Tilmaamaha dheeraadka ah ama xadidnaanta.***

*<u>[Haddii meesha hoose aanay ku filnayn, waxaad lifaaqi kartaa boggag dheeraad ah.</u>*
*Haddii aanad haysan wax tilmaamo dheeraad aha ma xadidnaanshaha, ku qor "Waxba" hoos.]*

**SAXEEXA KU DHAWAAQAHA**

Waxaan fahmay in aan ka masuul ahayn inaan u sheego xubnaha qoyskayga iyo wakiilka lagu magacaabay Awooda Qareenka Daryeelka Caafimaadka (haddii aan mid haysto) dhakhtarkayga, qareenkayga, la taliyahayga diinta iyo kuwa kale waxa ku saabsan Bayaanka dardaaranka Nolosha. Waxaan fahmay in aan siinayo nuqulo Bayaanka Dardaaranka Nolosha ah qof kasta.

Waxaan fahmayaa inaan saxeexayo (ama inaan faro shakhsi inuu ii saxeexo) Dardaarankan Nolosha oo sheego taariikhda saxeexayga, iyo in saxeexa miduun uu markhaati ka yihiin labba qof oo wayn kuwaas oo u qalma saxeexa AMA saxeexida in lagu hor qirto nootaayada dad waynaha. [R.C. §2133.02]

Waxaan magacayga ku saxeexyaan Bayaankan Dardaraanka Nolosha

ee________________, xaga ______________________________, Ohio.

_____________________________________________

Ku dhawaaqaha

**[Dooro Markhaatiyada AMA Qirashada Nootaayada ah.]**

**MARKHAATIYADA** [R.C. §2133.02(B)(1)]

*[Dadka soo socda UMA adeegaan sidii markhaatiga Bayaanka Dardaaranka Nolosha:*

- *Wakiilkaaga Wakiilashada Daryeelka Caafimaadka, haddii ay wax jiraan;*
- *Masuulka qofkaaga ama hantida, haddii ay wax jiraan;*
- *Wakiil kasta oo beddelaya ama masuulka, haddi ay wax jiraan;*
- *Qof kasta oo dhiig aad wadaagtaan, guur, ama korsasho (tusaale ahaan, xaaskaaga iyo carruurta);*
- *Dakhtarka ku dawaynaya, iyo*
- *Maamulaha kalkaaliso guri halka aad daryeelka ku helaysid.]*

***Waxaan caddaynayaa in Ku dhawaaqaha bayaanka ama qirtay anigoo jooga, oo uu Ku dhawaaqahu u muuqday inuu fayoobaa oo aan la khasbin, aan la khiyaamayn ama saamayn aan la filayn.***

________________________________/________________________________/______________
Saxeexa Markhaatiga Kow Magaca     Daabacan ee Markhaatiga Kow     Taariikhda

_______________________________________________________________________________
Cinwaanka Markhaatiga koowaad

________________________________/________________________________/______________
Saxeexa Markhaatiga Labbaad Magaca     Daabacan ee Markhaatiga Labbaad     Taariikhda

_______________________________________________________________________________
Cinwaanka Markhaatiga labbaad

***<u>AMA, haddii aanay jirin markhaatiyaal:</u>***

**QIRASHADA NOOTAAYADA** [R.C. §2133.02(B)(2)]

Gobolka Ohio
Degmadda______________________ss.

Taariikhda___________, aniga hortayda, nootaayada dad waynaha hoos la saxeexay, shakhsi ahaan yimid ______________________________________, Ku dhawaaqaha Bayaanka Dardaaranka Nolosha sare, iyo kaas oo qirtay in isaga/iyadda uu fuliyay ujeedo isku mid ah oo qoraalka lagu caddeyay. Waxaan caddaynayaa ku dhawaaqahu inuu u muuqdo mid niyad caafimaad leh qaba oo aan la khasbin oo aanay jirin khiyaama ama saamayn aan la filayn.

______________________________________
Nootaayada Dad waynaha

Wakhtigayga nootaayadu way dhacaysaa: _____________

Khidmadaydu waa joogto: __________________________

*© Janaayo 2022. Dib waa loo daabici karaa isticmaalka dad waynaha, qareenada, caafimaad iyo dhakhtarka cudurada oo dhan, cusbitaalada, ururada qareenada, bulshooyinka caafimaadka iyo ururada aan macaash doonka ahayn iyo ururada. Dib looguma soo saaro karo dhaqaale ahaan iib ku ah macaash.*